


"Xikmadu waa baadida qofka muuminkaa"







"Nolosha waa is
miisaan kaliya"



ACCEPT
"Noloshu hal weji maaha"
#SPTPictureThis



"Isku day inaad mar
walba isbadal ujoog
ahaatid se ha ka tagin
waxaad aaminsantay"


'Riyadu maaha waxaad
Ku aragto hurdada se
waa waxa kuu diida
hurdada"


"Barro naftaada ka hor
intaanad barran kuwa
dadka kale"


"Hadaad rabto inaad sida
cadceeda u ifto marka hore
kulayllkeeda yeelo"



"Hal tilaabo ood qaado
ayaa kawacan kun tilaabo
oo lagugu caawiyey"


"Noloshu hadaanay riyo
lahayn waa sida shimbir
bilaa baalala"



"Intaad nooshahay wax
kasta waa Suurto gal"


"Kama xumi waxay dadku
iga sheegaan waayo waxa
aan ogahay in aan Ahay
Aadame GAF badan iyo
ilaahay oo qalbigayga kaliya
iga xisaabinaya"


"fikrad aanay khatari
Ku jirin lama odhan
karro waa waa fikrad"



"Hadalku waa sida dawada
hadaad badsato wey Ku
dili hadaad yaraysatana
wey Ku anfici"



"Raaligalintu waa passport
lagu marro qalbiyada dadka"


"Yaan laguu isticmaalin sida
sigaarka ay Ku iibsadaan
lacagtooda markay dan kaa
leeyihiin,markay kaa
dhameystaana ay Ku aasaan
kabahooda"

"Jeclow inaad riyadaada
Ku noolaato"




"Dhamaanteen waxaynu
ubaahanahay wakhti
raaxo si aynu dib isugu
habayno"


"Xasuusaha qaar ma ilaawi
karro waayo waxaynu la
qaadanay wakhti qurux
badan"

WEEDHA QORAAGA

MARMAR SIDAAD USOO


SAARTO WAX QURUX BADAN

WAA INAAD GARRAB

MARTAA XEERRAR HORROO

JIRRAY, SI AAD U GAADHO

SAAMEYN TOGAN OO BULSHEED.


"Isku day inaad noqoto
geed xataa hadii dhagax
lagu tuuro soo daadsha
midho"


"Doqonku fursada dhib ayuu
moodaa se nin karmeedku
dhibta ayuu fursad ka dhex
arkaa"


"Ninku markuu hanto
gabadha ayuu dhamaadaa
jacaylkiisu ,gabadhuna
markay ninka hanato
ayuu bilowdaa"


"Ma jeclaataa caruurnimo
oo mid kaa tagay ama
dhintay aad u haysato
inuu kaliya safar Ku
maqan yahay"



"Dagaalku waa xalka
ugu danbeeya ey umadi
isku difaacdo"
IRNA 1934
عکس از: قرج صمدی
Date & Time: 1393/10/05 - 14:41
Uploaded @ Military.ir


"Ha umalayn haduu doqon
isku eego muraayad inuu
fariid kasoo bixi"

"I have a dream"

"Riyo Yeelo waligaa"






"Qof aad sirtaadii u
sheegtay waa hubaal
inaad isugu dhiibtay
warran uu maalin uun
kugu gani doono"



"Make-up waxa uu
qurxiyaa muqaalka sare
ee dumarka marsada
se ma qurxiyo quruxda
hoose ee qalbigooda"


"Nolosha adag ayaa
iga dhigtay qof adag"



"Wax ka xuni ma
jirraan markaad iska
dhiibto rajaadii ood inyar
u jirtay"



"Weynu jeclaanay markaasay
naga tageen weynu u xiisnay
se inama dareemaan se
markaynu qarka usaaranahay
inaynu ilawno ayey nagu soo
noqon"



"Dadku wey arki karaan
dhaawaca dushaada Ku
yaalla se xanuunkiisa
adaa og"


"Hadii qofi Ku yidhaahdo
waxaan kuu jecelahay sida
walaalkay oo kale xasuuso
qaabiil iyo haabiil oo kale".


"Gacan kaliya oo Ku caawisa markaad baahan tahay ayaa ka wanaagsan boqol gacmood oo Ku salaama markaad Guulaysato"





"Ruuxa jecel naftaada
oo kaliya maaha
macnaheedu inuu
jeclaan doono noloshaada
oo dhan"



"Waxa jira quluub aan
ina nicin xumaan kasta
oynu Ku samayno,waxaana
jira quluub ina neceb si kasta
oynu u sharafno"



QOFKA TAARIKHDA AKHRISTA
WAXA U LA NOOLYAHAY
SADEX JIIL.


"Hadaad nabad galyeyn
karto masiibo ,xaq waxay
noloshu kuu siinaysaa inay
nolol cusubi Ku tiraahdo
"Soo dhawoow".


أحمد ديدات
Ahmed Deedat
"Hadii aad adigoo Muslim ah
ka baxdo diinta islaamka
waxba maad yeelin diintu
sideeday ahaanaysaa" diidaat



"Kalinimadaa dhaanta
asxaab aad agtooda Ku
dareento Kali"
@dca


"Ilaahayow sidaad aduunyada
ii keentay anigoo bilaa dunuuba
ilaahayow iga kaxee anigoo
bilaa Dunuuba"



"geesinimaduba waa
kusii socoshada khatarta
aad ogtahay inay guuli
xigto"


"Noloshu haday raaxo tahay,
dunida maynaan nimaadneen inaga oo Ooyeyna"


"Lamaanaha wanaagsan
waa midka Ku beerta
ubax qurux badan qalbiga
lamaanihiisa kale"


"Iska illaw qofkii
ka hadhay noloshaada
waayo umuu qalmayn
inuu la jaanqaado
noloshada mustaqbal"


"Muminka waxa uu
Quraanku u siyaadiyaa
iimaan iyo qalbi qoyan"


"Hadii aad haysato
buug wanaagsan shaki
karna taagna inaad
haysato saaxiibka ugu
daacadsan Dunidan"


"Waxa jira dumar
wakhtiyada adag aanad
ragba Ku doorsanayn"



"Iskaashi ayaa guul ah"



"Waxa jira dumar
wakhtiyada adag aanad
ragba Ku doorsanayn"


AMC
مركز حلب الإعلامي
"Hadaad u noolaato siday
dadku Ku aqbali lahaayeen
waa hubaal inaad diidmadooda
u dhiman doonto"



"Jacaylku waa jaahilnimo
heshay qalbi madhan"


"Dayacu waxa uu
burburiyaa xidhiidh kasta
oo adag"



"Inaad ka xumaataa waa geesinimo,inaad cafisaana wey kasii adagtay,inaad ilawdaana waaba farxadaada"


"Wacnaan lahaydaa haday
dadku ogaan lahaayeen in
aduunyadu tahay boosteejo
ama istaan"



"Islaamku waa diin marmar
xatta cadawgeeda u dhiibi
karta gacan wadanoolaanshiyo"



"Ma daneeyo cidda
gadaashayda ka hadasha
waayo waxaan ogahay
in markay ihoryimaadaan
ay aamusi"


"Hadii uu qof kusiiyo
halmar cudur-daar
maqnaansho ah
adna sii kunjeer oo
mahadnaq maqnaanshihiisa"


"Dabka ugu kulul ee
qof gubaa waa xiisaha"


" Farxaduba waa Ku qanac
waxaad haysato kana qanac
waxaanad hellayn"


"Hogaamiye dadkiisa ma
yidhaahdo orda se waxa
uu yidhaahdaa ina mariya
hogaankana u qabtaa"


"Shayga ugu quruxda
badan ee caalamkan
aad Ku haysato ayaa
ah caqliga aad Ku garato
qiimaha naftaada"


"Danbi maahan inaad
Ku dhalato faqri se
waxaa danbi ah inaad
faqri Ku dhimato"




"Hadaad rabto inaad meel hore ugaadho Kaliga safar,hadii dariiqu dhib badan yahay koox raac"



وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ۚ أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَن يَأْكُلَ لَحْمَ
أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرِهْتُمُوهُ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ ۚ إِنَّ اللَّهَ تَوَّابٌ رَّحِيمٌ(12)
Qaarkiina Qaar Yuusan Xamanin,Miyuu
Jecelyahay Midkiin Inuu Cuno Hilibka
Walaalkiis Oo Mayd ah, Waa Neceb
Tihiin Arintaa,Eebana Ka Dhawrsada
Waa Tooba Aqbale Naxariiste(12)
{Surah Al-Xujuraat}


"Beenta ugu weyn eed
naftaada u sheegtay
waa inaad tiraahdid
waad guul daraysatay"



"Waajib kuma aha in
aad dadka raaligaliso
se waxa waajib kugu ah
in aanad dhibin"



"ilintu waa kalmado
Ku qarsoon qalbiyada
oon lagu jaangoyn
karrin hadal"



"Kaliya waxaan ahay
Adoomad danbi badan oo
leh Illaah danbi dhaafe
badan ah"



"Quluubtu waa sida
beero, Ku beero
wanaag hadaad ka
heliweydo midho waxaad
ka heli udug iyo
muuqaalo qurxoon"


"Bunka jilaalku waxa
uu ka dhirimaad badan
yahay qalbiyada qaar"


"waxaanad gacantaba
Ku hayn miyaad wali
haybisaa"


"Murugo badanaa markaad
ka tanaasusho hammi aad
lahayd si ay bal noloshu u
socoto"
اعداد: كارشي



"Nolosha ayaa geerida
weydiisay"Maxay dadku
Aniga iijecel yihiin adigana
kuu neceb yihiin? waxay
ugu jawaabtay "Waxay kuu
jecel yihiin waxaad tay been
qurux badan ana waxaanay
run xanuun badan"


"Neefka adhiga ahi
hadiyo jeer waxaa uu
ku dhex jiraa koox se
libaaxu isagu kalibuu
socdaa"


"Qof sii kaluun si uu maalin
u noolaado qofna bar
kaluumaysi siduu waligii
u noolaado"


"Muhiim maaha inaad
boqor noqoto se waxa
muhiima inaad u dhaqanto
sida boqorada marmar"



"Maanta wax qabso si
mustaqbalkaagu kugu
mahad celiyo"


"Ma jiro hudheelada
iyo meelaha laga
cunteeyo miis leh
kursi kaliya sidaa
awgeed noloshu sxb
kama maaranto"



"Kaliya waxaa raaxo
kugu filan La sheekaysiga
saaxiib daacada"


"Dadka waxaa ugu
wacan kuwo isku
dayga wanaagsan
mar walba'



"Waxaa jira kuwo aan
haynin fursadaha nolosha
eed adigu haysato balse
dhibta ah ma aragno"



"Dumarku waa sida
shinida waxay kuu samayn
malab se wey Ku qaniini
karaan"


"Lacagtu sida Diinka
ayey kuu soo gallaysaa
sida orodka deeradana
wey kaga baxaysaa"


"Shimbir Ku taagan laanta
geed kama cabsato inay
laantu la go'do waayo
kalsoonideedu maaha laanta
ee waa baalasheeda"


"Muhiim maaha siday
dadku kuu haystaan
se waxaa muhiim sida
aad isku haysato"



Hindisaha ugu wanaagsan
waa adigoo biriish ka dul
dhista webiga quusta


"Ku qor ciida xumaanta
ay kugu sameeyaan
asxaabtaadu si ay
hore ugu baaba'aan,ku qor
dhagaxaanta wanaagay
kuu sameeyaan si aanay
waligood u baabi'in"


"Qofka kula joogi waaya
wakhtiga murugadaada xaq
uma laha inuu Ku horyimaado
waxkhtiga farxadaada"


Weedha Qoraaga

DHIGGANAHAN WAXAA LOO NASHQADEEYEY SIDA DHIGGANAYAASHA DHIIRIGALINTA EE RAADEYNTA BADAN,MALAHA WAX XIGGASHAA KOLLEY KU TAHAY KUWA QORAAGA BUUGGAN.



"Dadka waxa u wacan
qof arkay ceebeheena
balse aan inagu nicin
oo wali ina jecel"



"Kufiiaan badan ayaa
inaga dhiga kuwo si
hagaagsan u socda
ugu danbeyn"



"Dad ayeynu u burburinaa
farxadooda si aynu inagu
bal u faraxno"


"Ha is dhiibin axmaq kaa
danbeeyey ayaa kaa
horeyn doona"


"Dhoolacadee hadaad wali
ilko leedahay"


"Dadka badh ayaa u ooya
siday u ilaawaan,Badh kalana
waxay u qoslaan si iyana ay u
ilaawaan,badh kalana ayaa
u seexda iyana bal inay
ilaawaan anigu sameeyey
afartiiba hada ma ilaawin,
xanuun badanaa caashaqu"


"Muhiim maaha waxa
kugu dhacay se waxaa
muhiima sidaad uga
jawaabto"


"Mid kamid casharada
ugu adag ee Nolosha
ayaa ah inuu qofku
barto si loo dhaho
nabad galyo"

NABAD GALYO

MUDANE/MARWO WAXAAN FILAYAA INAAD INYAR KA FAA'IIDEY DHIGGANAHAN FALSAFADA NOLOSHA EE KOOBAN.

WAXAAN KAAGA MAHAD CELINAYA A AKHRISKAAGA QAALIGA AH.

LA SOCO DHAWAAN VOLUME 2.....